Guudmarka qodobada ugu muhiimsan

- Ururrada qaxootigu hoggaamiyo (RLOs) ee kusugan Kenya waa ay kala duduwan yihiin dhanka nooca ama qaabka; waxay isugu jiraan kooxo yaryar iyo ururro kudhex jira bulshooyin dhowr ah iyo ururro kasii ballaaran iyaga oo u diiwaan gashan sidii ururro bulsho kusalaysan (CBOs) ama ururro aan dawli ahayn (NGOs). Kooxo kale waxaa sidoo kale kujira ururro diin ku salaysan oo rasmi ah iyo kuwo aan rasmi ahayn iyo kooxo lacag kaydin.
- Qaxootiga jooga Kenya ayaa abuura RLOs si ay u buuxiyaan meelaha bannaan ee aysan buuxinin ururrada gargaarka iyo hay'adda qaxootiga ee qaramada midoobay (UNHCR) ee ah dhanka adeeg gaarsiinta dadka iyo bixinta adeegyada. Magaalooyinka gudahooda, RLOs waa meesha ugu horreysa ee ay lasoo xiriiraan qaxootiga cusub ee soo galootiga ah qaarna waxay bixiyaan guryo lagu badbaado oo loogu tala galay qaxootiga aanan kiro iska bixin karin.
- RLOs waxay bixiyaan adeegyo waxbarasho (gaar ahaan waxbarashada dadka waaweyn, tababar kusaabsan Ingiriisi iyo tababar dhijitaal ah), nolol, nadaafad iyo adeegyada beero falashada oo ay ka bixiyaan gaar ahaan xeryaha. RLOs gudaha magaalooyinka iyo xeryahaba waxay door muhiim ah ka qaadanayeen qeybinta raashinka iyo waxyaabaha kale ee loo baahan yahay intii uu socday COVID-19.
- Badi RLOs-ka rasmiga ah waxaa hoggaamiya Congolese aqoon leh. Arrintaan sababteedu waa inay ku tala jiraan inay lahaadaan shabakado intii hore ka ballaaran bulshooyinka kalena waxay ku tiirsan yihiin ururro beeleed aan rasmi ahayn. RLOs-ka ay hoggaamiyaan Congolese laakiin waxay badanaa shaqaaleysiiyaan dad dalal kale kasoo jeeda iyo xirfadleyaal ka tirsan bulshada martida loo yahay. Meelaha qaxootiga isku dal kayimid ay kunool yihiin, RLOs waxaa la filayaa inay hirgaliyaan dadkaas dalkaa ka yimid.
  Badi RLOs waxaa abuura rag in tiro yar ahna kooxaha waa kooxo haween ay hoggaamiyaan. Arrinkaa waxaa u sabab ah caqabadaha qaab-dhismeedka iyo dhaqanka ee dumarka badankood ay wajahaan. Dumarku waxay leeyihiin xiriirro yar, badi waa laga reebaa go'aan gaaridda dadka ka qeyb qaadanaya badankooduna waxay soo qaateen waxbarasho aanan rasmi ahayn oo qura.
- Magaalooyinka gudahooda, RLOs waxaa yaqaana bulshooyinka qaxootiga ah ee kunool meelaha ay ka shaqeeyaan. Meelaha qaxootigu ku yaryahay, caadiyan ma yaqaanaan ayagu jiritaanka qaxootiga. Xeryahan gudahooda, RLOs aad ayaa looga yaqaan gaar ahaan kuwa indheergaradka iyo RLOs-ka waaweyn. Dhallinyarada ayaa loo badinaayaa inay ka warqabaan RLOs-ka badankood.
- Madaxda dawladda ee xeryaha ka shaqeeya sida kuwa Waaxda Adeegyada Qaxootiga ayaa ka warqaba RLOs-ka diiwaangashan iyo kuwa aan diiwaan gashanayn intaba maadaama ay dusha kala socdaan diiwaangalinta ururrada bulshada. Magaalooyinka, jiifafka deegannada kala duwan iyo booliska ayaa ogsoon RLOs-ka. Jiif (chief) ayaa dusha kala socda helitaanka diiwaangalinta booliskuna wuxuu la tashadaa qaar ka tirsan RLOs-ka haddii qaxootiga lagu soo eedeeyo inay dambi galeen.
- Ururrada aan dawliga ahayn iyo hay'adda qaxootiga ee qaramada midoobay ee UNHCR waxay ogsoon yihiin jiritaanka RLOs intii hore ka waaweyn oo ka jira magaalooyinka iyo xeryahan gudahooda.

- Tabarucaadaha laga helo xubnaha ayaa fududeeya hirgalinta RLOs-ka badankood. Hawlaha xiga ayaa dhaliya dano iyo fangareyn laga helo ururrada aan dawliga ahayn iyo deeq-bixiyeyaasha dibadda oo waxaa laga yaabaa intaa kadib in la istaajiyo tabarucaadaha xubinimada. Qaar ka tirsan RLOs waxaa ay qarash ka helaan uruurinta tabarucaadda oo ay internetka ku sameeyaan, gargaar ay ka helaan qurba-joogta iyo tabarucaado laga helo hawlaha sida mashaariicda maciishadda iyo hawlaha dhaqanka.
- RLOs waxay leeyihiin xiriirro intii hore ka ballaaran iyo shabakado loo yaqaano sidii RLOs indheer garad ah. Gudaha xeryaha iyo magaalooyinka, RLOs-ka indheer garadka ah waxay qeyb ka yihiin shabakadaha sida RELON-Kenya.
- Kafaaiideysteyaasha ayaa sheega in adeeg bixinta RLOs inay tahay degdeg ayna waxtar leedahay. Qaarkood ayaa sheega in loola dhaqmo si faham iyo qaddarin leh qaar kalena waxay ku daraan in adeegyada RLOs ay baahiyahooda daboolaan. Si kastaba ha ahaatee, haweenka iyo dadka waayeelka ah ayaa dareema in laga reebay adeegyada maadaama ururradaas badankoodu diiradda saaraan dhallinyarada. Kafaaiideysteyaal dad aanan ahayn oo kale oo bulshada ku dhex jira ayaa dareema in koox qabiil gaar ah kasoo jeedda RLOs-ka ay hirgaliyeen laga yaabo inay diiradda saaraan wax u qabashada dadka ay isku qabiilka yihiin oo kaliya.
- Bulshada qaxootiga ah ayaa utixgalisa adeeg bixinta RLOs inay tahay mid si fudud loo heli karo maadaama sida kasoo horjeeda ururrada gargaarka iyo hay'adda qaxootiga ee qaramada midoobay RLOs bulshada dhexdeeda lagu hirgaliyo. RLOs waxaa ay u ogolaadaan kafaaiideysteyaasha inay isticmaalaan luuqadooda afka hooyo waxayna bixiyaan cawimaad inkastoo dhanka aqoonsiyada caqabado ay kajiraan taasi oo ah si ka duwan sida ururrada aan dawliga ahayn iyo hay'adda qaxootiga ee qaramada midoobay ay yeelaan. Qaarkood ayaa dareema in RLOs ay si ka wax tar badan ururrada aan dawliga ahayn iyo hay'adda qaxootiga ee qaramada midoobay wax ugu qabtaan kafaaiideysteyaasha ayna abuuraan shaqooyin lacago fiican lagu qaato oo loogu tala galay qaxootiga.
- Hoggaamiyeyaasha iyo kafaaiideysteyaasha iyo qaar ka tirsan mas'uuliyiinta dibadda ee RLO waxay u tixgaliyaan RLOs inay yihiin kuwo aad saamayn u leh maadaama ay bulshada aad ugu dhow yihiin ayna awoodaan inay si wanaagsan u fahmaan bulshada. RLOs waa meesha ugu horreysa ee ay lasoo xiriiraan qaxootiga cusub ee soo galootiga ah ee jooga magaalooyinka waxayna yihiin ilo muhiim ah oo xogta ay qaxootigu kuwadaagaan. Arrinkaan wuxuu gaar ahaan caddaaday intii uu dillaacay COVID-19 markii RLOs ay muhiim u noqdeen bixinta adeegga.
- Saamaynta RLO ee gudaha Kenya waxay ku xiran tahay helitaanka shabakado iyo qaabka wax loo xakameeyo. Hoggaamiyeyaasha RLO ee khibrad horay ugu lahaa la shaqeynta hay'adda qaxootiga ee qaramada midoobay ee UNHCR iyo ururrada gargaarka ee kale waxaa ay awood badan u leeyihiin inay qarash ka helaan ururrada aan dawliga ahayn, UNHCR iyo qurbajoogta; oo hoggaamiyeyaasha RLO ee xiriirka la leh dawladda madaxdeedu waxay si fiican awood ugu leeyihiin inay diiwaangalin helaan. RLOs-ka diiwaan gashan waxay awoodaan inay codsadaan fangareyn dibadda kasocota iyo mararka qaarkood inay shaqeeyaan ayagoo iskaashi la leh ururrada aan dawliga ahayn halka RLOs-ka aanan diiwaan gashanayn ay wajahaan caqabado markii ay qarash iyo deeqo codsanayaan.

RLOs gudaha Kenya lama lahan iskaashi macno badan leh ururrada aan dawliga ahayn ama hay'adda qaxootiga ee qaramada midoobay ee UNHCR; si kastaba ha ahaatee, qaar ka tirsan RLOs waxay ka helaan deeqo ururrada aan dawliga ahayn si ay u fuliyaan mashaariic.

Caqabadaha RLOs ay la kulmaan waxaa kujira caqabado dhanka qarashka ah, diiwaangalin la'aan, la'aanta awood dhisidii loogu tala galay shaqaalaha iyo hoggaamiyeyaasha RLO, iyo kusoo celcelinta adeegyada oo ay sameeyaan RLOs badan.

Tillaabooyinka RLOs ay qaadeen si ay ula dhaqmaan caqabadahaan waxaa kujira inay isku dayeen dhisidda xiriirro badan oo ka dhexeeya RLOs iyo shabakadaha RLO si ay u helaan fursad ay ku soo bandhigaan shaqadooda ayna isaga kaashadaan mashaariicda. Qaar ka tirsan RLOs ayaa sameeya hawlo dakhli abuurid ah sida ka shaqeynta xafladaha aroosyada iyo siinta koronto xeryaha.

Tala bixin

- Taageerada loo doonayo RLOs waxaa kujira fan gareyn iyo in loo tixgaliyo fursadaha mudada dheer ee fangareynta. RLOs waxay sidoo kale u baahan yihiin dhismaha awoodda iyo tababar xirfadeed, iskaashi inay la sameeyaan ururro kale oo aan dawli ahayn iyo hayadda qaxooti ee qaramada midoobay (UNHCR), iyo taageero in laga siiyo qoridda dukumiintiyada iyo diiwaan galinta.